Ku Saabsan dib-u-cusboonaysiinta Mashruuca Isbeddelka Medicaid

Gobolka Washington wuxuu wadaa dib-u-cusboonaysiin shan-sano ah oo lagu sameynayo ka-tanaasul lagu soo bandhigayo Qaybta 1115 ee Medicaid, oo loo yaqaanno Mashruuca Isbeddelka Medicaid (MTP). MTP ayaa u oggolaanaya gobolkeenna sii wanaajinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Washington iyadoo la adeegsanayo maalgelinta federaalka ee Medicaid.

Gobolka Washington ayaa hadda ku jira sannadkii ugu dambeeyay ee ka-tanaasulka MTP, kaas oo dhammaanaya 31-ka Disembar, 2022. Haddii la ansixiyo, dib-u-cusboonaysiinta MTP waxay **bilaaban doontaa 1-da Jannaayo, 2023, waxayna dhammaaneysaa 31-ka Disembar, 2027**. Dhammaan shaqada hoostageysa mashruuca MTP ayaa waxaa ka faa'iidaya dadka ku qoran Apple Health.

Waa maxay Apple Health (Medicaid)?

Apple Health waxaa barnaamijka Medicaid ee Gobolka Washington, kaas oo caynsanaan caafimaad siiya ku dhowaad laba milyan oo qof. Medicaid waa barnaamij federaal oo uu maamulo gobol kasta. Dowladda federaalka ayaa gacan ka geysaneysa bixinta lacagta barnaamijka, abuureysa xeerarka sida uu barnaamijka u shaqeeyo, waxayna dejinaysaa heerarka ugu yar ee xaq-u-yeelashada iyo dheefaha.

Waa maxay ka-tanaasulidda Medicaid?

Gobolku waa in uu codsadaa ka-tanaasulidda Medicaid marka uu doonayo in uu isbeddelo ku sameeyo tilmaamaha caadiga ah. Gobolku wuxuu dowladda federaalka waydiinsan karaa (iyadoo uu u marayo Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS)) ka-tanaasulkan. Gobolku wuxuu codsan karaa in ka-tanaasulka xeer-nidaamiyeyaasha qaar si loo helo debecsanaan ku saabsan dheefaha iyo xaq-u-yeelashada Medicaid, sida daryeelka loo bixiyo, iyo waxyaabo kale. CMS ayaa caadi ahaan keliya ansaxiya ka-tanaasulid loogu talagalay waqtigiiba.

Si loo sii wado sii wanaajinta Apple Health, Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) ee Gobolka Washington iyo hay'adaha kale iyo la-hawlgalayaashooda waxay diyaarinayaan barnaamij lagu cusboonaysiinayo ka-tanaasulidda MTP ee hadda. Barnaamijkan waa mid ka mid ah dhowr siyaabood oo uu gobolku kaga shaqeynayo daryeel qofka dhan ah oo loogu talagaly dhammaan.

Dokumentigan wuxuu wadaagaa shaqada bilaaban doonta ama sii socon doonta si waafaqsan dib-u-cusboonaysiinta MTP. Barnaamijyadu waxay hoos imaanayaan saddex yool midkood:

1. Ballaarinta caynsanaanta iyo helidda daryeelka, hubinta dadku in ay heli karaan daryeelka ay u baahan yihiin
    - Isqoritaanka Apple Health ee joogtada ah ee carruurta
    - Caynsanaanta dib u soo gelidda iyo adeegyada loogu talagaley dadka galaya ama ka baxaya xabsiga, jeelka, ama hay'adaha kale ee asluubta
    - Caynsanaanta Apple Health ee la ballaariyey uurka ka-dib
    - Taageerada loogu talagalay dadka qaadanaya daaweynta ama cilaajka xanuunta isticmaalka maandooriyaha iyo caafimaadka dhimirka
2. Horumarinta daryeelka aasaasiga ah, ka hortagga ah, ee guriga- iyo bulshada ku saleysan ee qofka oo dhan
    - Barnaamijyada Daryeelka Beddelka ah ee Medicaid (MAC) iyo Taageerada Habboon ee Dadka Waaweyn (TSOA), oo lagu darey taageerooyinka LTSS ee cusub
    - Qiiemeynta is-dhexgalinta Caafimaadka Hab-dhaqanka
3. Dedejinta daryeel bixinta iyo hal-abuur lacag-bixineed oo diirradda lagu saarayo baahiyada bulshada ee caafimaadka la xiriira
    - Istiraatiijiyadaha wax looga qabanayo baahiyada bulshada ee caafimaadka la xiriira (tadawurka Hindisaha 1)
    - Taageerada Bulshada ee Aasaaska ah

Yoolka 1aad: ballaarinta caynsanaanta iyo helidda daryeelka, hubinta dadku in ay heli karaan daryeelka ay u baahan yihiin

Isqoritaanka Medicaid ee joogtada ah ee Carruurta

Barnaamijkan wuxuu u oggolaan doonaa dhammaan carruurta Medicaid-ku-qoran ee ku dhaqan Washington kuwaas oo dakhliyada qoyskoodu ay ka hooseeyaan boqolkiiba 215 ee Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL) in ay ku sii qornaadaan Medicaid **ilaa ay da'doodu ka gaareyso lix.**

Waayo-aragnimada carruurnimada hore ayaa si weyn u saameeya caafimaadka iyo wanaagga nolosha oo dhan. Koboca iyo koriinka ugu fiican xilliga carruurnimada hore waxay saameyn muddo-dheer soconneysa ku leeyihiin caafimaadka, guusha waxbarasho, iyo xaaladda bulsho-dhaqaale. Ballaarinta caynsanaanta joogtada ah ee carruurta ay da'doodu ka yar tahay lix waxay leedahay dheefo badan:

- Horumarinta yoolalka caynsanaanta Washington: in kastoo aad iyo aad u hooseeyo (boqolkiiba saddex) heerka caynsanaan la'aanta carruurta, qiyaastii boqolkiiba 11 ee carruurta ay da'doodu ka yar tahay lix ee ku dhaqan Washington waxay la kulmaan nusqaamo ka jira caymiska Medicaid sannadka la cayimay. Qiyaastii boqolkiiba 60 ee carruurta waxay leeyihiin nusqaamo ka badan saddex bilood.
- Kor-u-qaadista helidda daryeelka aasaasiga ah iyo kan ka hortagga (t.a., booqashooyinka ilmaha caafimaadqaba ee lagu taliyey iyo tallaalada iyo baaritaannada la xiriirta koritaanka) ee inta badan la carqaladeeyo marka ay carruurtu soo galaan kana baxaan Medicaid.
- Gacan ka geysashada kor-u-qaadidda saameynta wanaagsan ee maalgashiyada gobolka ee nidaamka qoyska ee xuddunta u ah ee isuduwidda daryeelka jirka, hab-dhaqan, iyo bulshada ee loogu talagalay carruurta yaryar.
- Kor-u-qaadista sinnaanta iyadoo wax laga qabanayo kala-duwanaanshaha juqraafi iyo midka qowmiyadeed ee carruurta la kulma nusqaamaha caynsanaanta Medicaid.
- In marka dambe la gaaro keydka barnaamijyada gobolka ee kala duwan ee u adeegga carruurta, sida nidaamyada daryeelka carruurta iyo waxbarashada gaarka ah.

Shaqadan waxaa keliya lagu hirgelin karaa ka-tanaasulka Medicaid. Wuxuu sidoo kale waafaqsan yahay yoolalka waaweyn ee u degsan CMS iyo miisaaniyadda Maamulka Biden ee loogu talagalay sannad maaliyadeedka 2022, kaas oo u aqoonsadey in ay mudnaan tahay "u fududeynta dadka xaqa u leh in ay helaan oo ayna ku sii caynsanaadaan Medicaid".

Ballaarinta caynsanaanta adeegyada dhalmada ka-dib

Gobolka Washington, ku dhowaad saddex-meelood meel ka mid ah dhammaan dhimashooyinka la xiriira uurka iyo inta badan is-dilista iyo qaadashada daawooyinka xad-dhaafka ah ee sida lama filaanka ah ku dhaca ee dadka dhalmada ka-dib ayaa dhacey inta u dhaxeysa 43 iyo 365 maalmood ka-dib marka uu uurkooda dhammaadey. Guddiga Dib-u-eegista Dhimashada Hooyooyinka ee Gobolka Washington ayaa tilmaamey helidda adeegyada daryeelka caafimaadka iyo nusqaamha ku imaadey sii socoshada daryeelka, gaar ahaan inta lagu guda jiro muddada dhalmada ka-dib, sida arrimaha gacanta ka geysan kara dhimashooyinka uurka la xiriira ee laga hortagi karo.

Waqti xaadirkan, shakhsiyaadka uurka leh ee ku jira barnaamijka Apple Health waxay helaan caymiska la ballaariyey ee dhalmada ka-dib oo 60 maalmood ah, oo bilaabanaya maalinta ugu dambeysa ee uu uurkooda dhammaado. Hase-ahaatee, Xeerka Qorshaha Badbaadinta Ameerikaanka (American Rescue Plan Act) (ARPA) iyo Hindiso-sharciyeedka Aqalka Sare (Senate Bill) ee 5068 (2021) ayaa amraya HCA in ay hadda ballaariso caysanaanta dhalmada ka-dib **min 60 maalmood ilaa 12 bilood** iyadoo laga bilaabayo taariikhda uu uurka dhammaado. Ka-dib dhammaadka muddada 12-bilood ee dhalmada ka-dib, gobolka Washington wuxuu dib-u-go'aamin doonnaa in uu shakhsiga xaq u leeyahay barnaamijyada kale. Ma jiro isqoritaan xaddidan oo hoos tagaya soo-jeedintan.

Marka barnaamijkan lagu daro dib-u-cusboonaysiinta, Washington waxay CMS wayddiisan doontaa dheefo la sii wanaajiyay, oo sii dheer waxa ARPA uu oggol yahay:

- Shakhsiyaadka uu dakhligooda ka yar yahay boqolkiiba 193 ee FPL waxay awoodi doonnaan in ay helaan caynsanaantan iyadoon loo eegayn xaaladda muwaadinnimada.
- Shakhsiyaadka aan horey ugu qornayn barnaamijka Apple Health waxay codsan karaan caynsanaanta dhalmada ka-dib wixii ka dambeeya 90 maalmood ka-dib dhammaadka uurka.

In shakhsiyaadka dhalmada ka-dib lagu sii xiriiriyo caynsanaanta ayaa oggolaaneysa in la helo fursado badan oo si degdeg ah loogu aqoonsanayo waxna looga qabanayo arrimaha si loo sii wanaajiyo caafimaadka loona yareeyo dhimashooyinka dhalmada ka-dib. Waxay sidoo kale yareyn kartaa baahida loo qabo adeegyada kharashaadka badan ee loogu talagalay waalidka iyo dhallaanka ku jira qolka xaaladaha degdegga ah ama goobaha daaweynta bukaan-jiifka.

Caynsanaanta dib-u-gelidda xabsiga ka-dib

Maanta, waxaa caymiskooda Apple Health (Medicaid) la hakiyaa ilaa iyo inta laga soo deynayo shakhsiyaadka gala jeel, xabsi, ama xarun asluubeed kale. Tani waxaa inta badan loogu yeeraa "ka-saaridda maxbuuska." Caynsanaanta baaxadda-ballaaran ayaa dib loo yagleelayaa marka shaksiga uu ka soo baxo xarunta.

Si aad u hesho daryeel caafimaad taabogal ah xabsiga ka-dib, hannaanka dib u yagleelidda baahiyada caynsanaanta ayaa bilaabanaya ka hor inta aan shakhsiga la soo deyn. Haddii kale, waxay abuuri kartaa dib-u-dhac maamul halkaasi oo qofku si khaldan ugu muuqdo "xaq uma laha" nidaamka Medicaid gudahiisa, taas oo ka dhigeysa in aysan helin daawooyinka ama adeegyada xanuunka isticmaalka maandooriyaha (SUD). Dib-u-dhaca ayaa abuuraha caqabado ku yimaada isuduwidda daryeelka, maareynta kiiska, iyo u wareejinta diiwaannada caafimaadka bixiyaha adeegga daaweynta ee ku habboon.

In ay helaan adeegyada caafimaadka isla maalinta ay u baahdaan ama maalinta ku xigta ayaa fure u ah dib-u-gelidda guusha leh. Nidaamkeenna hadda, boqolkiiba 75 ee shakhsiyaadka horey ugu jirey xabsiga ee lahaa xanuunka isticmaalka daroogada opioid ayaa dib ugu noqda saddex bilood gudahooda ka-dib siideynta. Waxaa intaa dheer, in dadkan in u dhaxeysa 40 iyo 120 jeer in ay u badan tahay in ay u dhintaan isticmaalka daroogo xad-dhaaf ah inta lagu guda labada toddobaad ee ugu horreeya ka-dib siideynta marka loo eego dadka kale. Si looga hortago natiijooyinkan dhimashada leh, dadka xabsiga ku jira waxay caamis ugu baahan yihiin jeelka oo ay heli karaan isla-marka la soo daayo.

Iyadoo uu jihayn ka helayo Golaha Sharci-dejinta, ayaa HCA wuxuu wayddiin doonnaa CMS in ay ka-tanaasusho qodobka "ka-reebidda maxbuuska" ee Gobolka Washington. Tani waxay dib u soo celinaysaa caymiska ilaa 30 maalmood ka hor siideynta iyo isticmaalka lacagta federaalka si loogu taageero adeegyada ku-meelgaarka ee loogu talagalay shakhsiyaadkan. Taageeridda dib-u-gelidda inta lagu guda jirro muddooyinkan ku-meelgaarka ah ayaa sidoo kale laga yaabaa:

- In ay kor-u-qaado daryeeka ka hortagga ah, yareynta booqashooyinka qolka xaaladaha degdegga ah ee mustaqbalka, adeegyada dhibaatada, joogitaannada bukaan-jiifka, dib ugu noqoshada, iyo suuragalnimada dib u geysashada fal-dembiyeed.
- In ay bixiso keyd suuragalka ah ee daryeelka caafimaadka iyo meelaha kale ee nidaamka taageerada bulshada.

Caynsanaanta SUD iyo IMD-ka caafimaadka dhimirka

Qaybtan ka-tanaasulidda MTP ayaa u oggolaanaysa Gobolka Washington in uu sii wado ku isticmaalka lacagta federaalka adeegyada caafimaadka dhimirka iyo daaweynta SUD gudaha xarumaha ah "hay'adaha cudurka dhimirka" (IMDs). Ka-tanaasulid la'aantan, xeerarka Medicaid waxay mamnuucayaan in lacagta federaalka loo isticmaalka adeegyada loo fidinayo shakhsiyaadka da'doodu u dhaxeyso 21-65 kuwaas oo la dhigay xarumaha IMD.

Ogow: IMDs ayaa sharci ahaan lagu qeexaa in ay yihiin cusbitaallada, xarumaha lagu xannaaneeyo waayeellada, ama xarumaha kale ee yaalla in ka badan 16 sariirood oo ugu horreyn bixiya adeegyada baaritaanka, daaweynta iyo daryeelka shakhsiyaadka qaba cudurrada dhimirka. Kuwan waxaa ka mid ah daryeel caafimaad, daryeel kalkaalin, iyo adeegyada la xiriira. HCA wuxuu aqoonsan yahay in ereyga "cudurka dhimirka" uu noqon karo mid waxyeello ah ama ceebayn keena. Waxaa ugu adeegsaneynaa xaaladdan keliya si aan ugu turjunno erey-bixinta sharciga ee lagu adeegsadey qaanuunka.

Hadda la joogo, sida ku cad barnaamijyada SUD iyo IMD-ka caafimaadka dhimirka:

- Gobolka waxaa loo oggol yahay in uu ku bixiyo kharashka daaweynta IMDs lacagaha federaalka iyo kuwa gobolka.
- Dadku waxay si wanaagsan u heli karaan daawooyinka loogu talagalay ikhtiyaarada daaweynta xanuunka isticmaalka opioid (MOUD).
- Dad badan ayaa heli kara daryeelka caafimaadka dhimirka ee bukaan-jiifka.
- Macaamiisha Medicaid waxay heli karaan adeegyo lagu bixinayo goobo cusub oo aan horey loo caymin.

Helidda ikhtiyaarrada kala duwan ee daaweynta caafimaadka dhimirka ayaa muhiim u ah bogsashada shakhsiyaadka la xanuunsan xanuunka dhimirka. Sannadka ugu horreeyay ee barnaamijka SUD IMD ee Washington, tallaabooyinka lagu helayo oo dhowr ah iyo daaweynta SUDs ayaa hagaagey. Tusaale ahaan, dad badan ayaa awoodey in ay helaan adeegyada ka hortagga iyo in ay bilaabaan barnaamijyada daaweynta, waxaanna sii kordhey tirada bukaannada qaadanaya daaweynta isticmaalka maandooriyaha.

Caynsanaanta SUD iyo IMD-ka caafimaadka dhimirka ee ka caafimaadka MTP ee hadda ayaa ku socon doonnaa dib-u-cusboonaysiinta ka-dib **isbeddelo la'aan** waxaanna la sii wadayaa maalgelinnada muhiimka ah ee tiknoolajiyadda ee loo baahan yahay ee waafaqsan ka-tanaasulidda.

Yoolka 2aad: horumarinta daryeelka aasaasiga ah, ka hortagga ah, ee guriga- iyo bulshada ku saleysan ee qofka oo dhan

Taageerooyinka iyo adeegyada muddada-dheer (LTSS)

LTSS ayaa taageeraya dadka gaboobay ee Washington iyo daryeelayaasha qoyska ee daryeela xubnaha qoyskooda. LTSS wuxuu ka kooban yahay ilaa laba barnaamijyo ka-tanaasulid hadda ah: Daryeelka Beddelka ah ee Medicaid (MAC) iyo Taageerada Habboon ee Dadka Waaweyn (TSOA), kuwaas oo labadaba.

- Ballaariya ikhtiyaarada daryeelka ee loogu talagalay dadka, ay da'doodu tahay 55 iyo kuwa ka waaweyn, si ay guriga u joogaan oo ay dib ugu dhigaan ama uga fogaadaan adeegyada aad iyo aadka gaarka u ah, sida u guurista xarunta lagu xanaaneeyo waayeellada.
- Caawiya daryeelayaasha qoyska ee aan lacagta qaadan, oo ay da'doodu tahay 18 ama ka weyn, kuwaas oo daryeela xubnaha qoyskooda iyagoo u suurageliya in ay helaan tababar; kooxo taageero; adeegyada xannaaneynta ku-meelgaarka ah; sahayda iyo qalabka caafimaadka gaarka ah; daaweynta iyo gacan ku hayn caafimaad; waxay ka caawiyaan shaqada guriga iyo hawlaha kale; iyo raashiinka guriga la keeno.

MAC ayaa taageero siiya daryeelayaasha qoyska ee aan lacagta qaadan ee daryeelaya dadka xaqa u leh Medocaid kuwaas oo aan waqti xaadirkan helin Medicaid LTSS.[1] MAC ayaa ka caawiya daryeelayaasha qoyska ee aan lacagta qaadan bixinta daryeel tayadiisu sarreyso ee loogu talagalay xubnaha qoyska, iyadoo sidoo kale ka warqaba wannaagooda iyo caafimaadkooda.

TSOA ayaa sameynaya dabaqad xaq-u-yeelasho cusub iyo xirmo dheef loogu talagalay dadka mustaqbalka u baahan kara Medicaid LTSS. TSOA ayaa ku caawinaysa dadka iyo qoysaska ka fogaanshaha ama dib-u-dhigidda saboolnimada iyo baahida mustaqbalka ee adeegyada ay Medicaid-maalgelisay. TSOA ayaa sidoo kale taageero siisa daryeelayaasha qoyska ee aan lacagta ku qaadan.

Hadda, sida ku cad MTP, shaqadan waxay beddelaysaa nidaamka bixinta daryeelka caafimaadka Medicaid iyadoo:

- Bixinaysa ikhtiyaaro dheeraad ah oo loogu talagalay dadka leh baahiyada daryeelka muddada-dheer.
- Kordhineysa helidda adeegyada loogu talagalay dadka ku sugan qarka saboolnimada.
- Tartiibinta isbeddelka koboca adeegyada dhaqan ahaan ay maalgeliso-Medicaid, oo ay ku jiraan Medicaid LTSS.
- Siinta daryeelayaasha qoyska ee aan lacagta qaadan taageero iyo aqoon si ay u sii wadaan bixinta daryeelka iyagoo sidoo kale naftooda daryeelaya.
- Ku caawinta dadka in ay guriga sii joogaan intii suuragal ah, iyo joogeynta nolosha madax-bannaan.

MAC iyo TSOA ayaa ku socon doonna dib-u-cusboonaysiinta ka-dib **isbeddelo la'aan.**

Si waafaqsan dib-u-cusboonaysiinta, Gobolka Washington wuxuu kuddari doonaa cunsurradan Medicaid LTSS ee cusub, kuwaas oo aan lagu dabakhi doonin MAC iyo TSOA:

- **Mas'uulnimada:** mas'uuliyiinta sharciga ah inta badan waa lagama maarmaan si loo bixiyo oggolaansho xog-ogaal loo yahay oo loogu talagalay ujeeddooyinka kala-guurka iyo daryeelka caafimaadka marka shakhsiyaadku ay awoodi waayaan in ay go'aamadan laf-ahaantoodu qaataan. Mas'uuliyiinta ayaa sidoo kale dad gacan ka siiya taageerooyinka go'aan-qaadashada muddada-dheer marka loo baahdo, t.a., haddii goobta daryeelka aysan aqbali karin macmiil iyadoon jirin taageerooyinka joogto ah.

  Hadda, Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington (DSHS) awood uma lahan in ay magdhow siiso mas'uuliyiinta sharciga ah iyadoo adeegsanaya lacagaha gobolka; shakhsiyaadka waxay keliya isticmaali karaan jeebkooda si ay ugu bixiyaan baahiyada mas'uulnimada. Cunsurkan wuxuu u oggolaan doonnaa DSHS in ay u magdhowdo mas'uuliyiinta uu qandaraaska kula jiro Xafiiska Guud ee Mas'uulnimada (OPG) kuwaas oo bixiya taageerada go'aan-qaadashada muhiimka ah ee loogu talagalay shakhsiyaadka ku tiirsan LTSS.
- **Daryeelka shakhsiyeed ee la isuduwey:** daryeelayaal badan oo xirfadlayaal ah waxay u baahan yihiin qaddarka ugu yar ee waqtiga booqashada macmiil kasta si ay uga dhigaan jadwaladooda kuwo la maareyn karo. Macmiil badan waxay caawimaad ugu baahan yihiin qaadashada daawooyinka iyo hawlo kale oo keliya qaata daqiiqado dhowr ah laakiinse waxaa loo baahan yahay dhowr jeer maalintii.

[1] Dokumentigan, LTSS waa barnaamijyada MAC iyo TSOA ee la bixiyo iyadoo loo marayo ka-tanaasulidda MTP. Marka la tixraacayo barnaamijka LTSS ee federaalka, waxaa loo qoraa sidan “Medicaid LTSS.”

Sida jadwaleynta ay hadda u dhacdo, macaamiisha inta badan uma heli karaan caawimaad xirfadeed noocyadan hawlaha ah haddii ay haystaan saacado ku filan daryeelaha in uu meeshaasi joogo inta badan maalintii mooyaane. Cunsurka cusub ee daryeelka shakhsiyeed ee la isuduwey ayaa oggolaanaya jadwaleyn aad u debecsan iyo helidda wanaagsan ee adeegyada loogu talagalay macaamiisha iyo daryeelayaasha halka adeegyada daryeelka shakhsiyeed loo fidiyo macaamiil ku wada nool meelo isku dhow.

- **Kabka kirada:** kirada iyo kabka kirada hadda lama oggola in lagu daro ka-tanaasulid kasta oo CMS ah ama qorshaha gobolka. Cunsurkan dheeraadka ah ee dib-u-cusboonaysiinta MTP ayaa wuxuu ballaarin doonnaa awoodda Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida (ALTSA) ee DSHS uu ku bixinaya kabka kirada ee saddexadan qaybood ee xaq-u-yeelashada:
  - Shakhsiyaadka ku jira goobo la dhigo ama xarun ah oo xaq u leh in ay helaan adeegyada ALTSA kuwaas oo doonaya in ay u wareegaan goob guri ah, laakiinse dakhligooda u baahan yahay in ay helaan kab kiro inta ay sugayaan kaalmada guryeynta la awoodi karo.
  - Macaamiisha ALTSA ee deggan barnaamijyada degaanka ee aan hadda la joogo lahayn dhabbe macquul ah oo ay ugu guuri karaan guri madax-bannaan. Kani waa daldaloolka ugu weyn ee ka jira qaab-dhismeedka kala-guurka ee hadda, waxaanna ka faa'iidi doonna shakhsiyaadka doonaya in ay u guuraan, oo ay ku abuuraan kartida loo baahan yahay barnaamijyadeenna degaanka ee jira.
  - Macaamiisha ALTSA ee loo oggolaadey barnaamijyada Guryeynta Taageerada leh ee Taageerada Bulshada ee Aasaaska ah ee u baahan kab kiro iyo adeegyo si ay u awoodaan guryeyn madax-banaan.
- **Xaq-u-yeelashada loo maleeyo:** xaq-u-yeelashada maaliyadeed ee loogu talagalay LTSS uu maalgeliyo-Medicaid ayaa hadda u baahan hannaan faahfaahsan oo lagu xaqiijinayo dakhliga iyo hantida. Tani waxay u baahan tahay qiimeyn fool-ka-fool ah, dib-u-eegista diiwaannada caafimaad, iyo wada-shaqeyn lala yeelanayo macmiilka, qoyskiisa, iyo xiriirrada kale si loo go'aamiyo haddii naafonimada shaqada ay sabab u tahay arrimaha caafimaadka dhimirka, waalli, iyo cudurro kale oo la oggaadey. Waxaa intaa dheer, qorshaha adeegga xuddunta u ah shakhsiga in loo baahan yahay ka hor oggolaanshaha adeegyada.
  Ballaarinta hannaanka xaq-u-yeelashada loo maleeyo (PE) si loo caymiyo shakhsiyaadka codsanaya LTSS degaanka ee ku saleysan bulshada iyo guriga waxay ka dhignaan doontaa in codsadayaasha ay awoodi doonnaan in ay helaan adeegyo degdeg ah, oo aasaasi ah ka hor inta aysan dhammeyn go'aaminta xaq-u-yeelashada dhammeystiran.
  Hadda la joogo, nidaamka wuxuu fududeynayaa qofka in uu aado hay'ad ama xarun marka loo eego in uu joogo gurigiisa. Ballaarinta PE ayaa ku caawinaysa dadka in ay taageero ku helaan goobta ay doonayaan. Waxaa ka mid noqon doona helidda adeegyada LTSS ee habboon iyadoo loo marayo ka-tanaasulka Doorashada Koowaad ee Bulshada iyo 1915(c) iyo caymiska caafimaadka ee Medicaid.
  - Xirmada dheefta LTSS PE ayaa la siin doonaa shakhsiyaadka iyadoo loo marayo hannaanka qorsheynta xuddunka u ah shakhsiga.
  - Shakhsiyaadka goor dambe si cad u noqda kuwo baahan (CN) ama qorshaha dheefta beddelka ah (ABP) ee xaqa u leh Medicaid xaq uma yeellan doonaan adeegyada LTSS PE.
  - Adeegyada loo bixiyo si waafaqsan dheeftan ma badin doonaan adeegyada loo caymiyay si waafaqsan caymiska gaarka loo leeyahay, Medicare, Medicaid-ka qorshaha gobolka, ama iyadoo loo marayo barnaamijyada kale ee gobolka ama federaalka.

Horumarinta daryeelka qofka oo dhan

Inta lagu guda jiro lixda sare ee ugu horreysa ee MTP, nidaamyada caafimaadka hab-dhaqanka iyo jirka ee isku dhafan ee guud ahaan gobolka, ee u socda dhanka daryeelka qofka oo dhan. Dib-u-cusboonaysiinta, gobolka wuxuu shaqadan la sii wadi doonnaa **qiimeynta mideysan ee barashada cudurrada dadka dhiman, naafada ah ama waallan ee jaango'an** iyo caawimaad farsamo oo loogu talagalay adeeg bixiyeyaasha.

Qiimeynta jaango'an ee gobolka oo dhan ayaa u oggolaan doonta adeeg bixiyeyaasha, qorsheyaasha, iyo gobolkaba in ay fahmaan horumarka ilaa iyo hadda laga gaarey mideynta iyo in ay aqoonsadaan fursadaha horumarka. La-hawlgalayaasha muhiimka ah ee shaqadan waxaa ka mid ah Bulshooyinka Caafimaadka ee Lala Xisaabtami karo (ACHs), ururrada daryeelka la maareeyo (MCOs), hay'adaha caafimaadka hab-dhaqanka, iyo kuwo kale.

Yoolka 3aad: dedejinta daryeel bixinta iyo hal-abuurka lacag-bixineed oo diirradda lagu saarayo baahiyada bulshada ee caafimaadka la xiriira

Taageerada Bulshada ee Aasaaska ah (FCS)

FCS waa iskaashi u dhaxeeya HCA iyo ALTSA oo uu maalgeliyay ka-tanaasulka MTP ee hadda. Amerigroup waa maamulaka dhinaca-saddexaad ee qandaraaska lala galey. Si wadajir ah, ayay ula shaqeeyaan hay'adaha kala duwan ee siiya adeegyada taageerada bulshada (oo sidoo kale loo yaqaanno guryeyn taageero leh) iyo adeegyada shaqada la

taageeray (oo sidoo kale loo yaqaanno adeegyada taageerada iyo meelaynta shakhsiga) ka-faa'iideystayaasha ugu nugul gobolka ee Medicaid ee leh baahiyada daryeelka ee qaybaha kala duwan ka sameysan.

Adeegyadan waxaa loo nakh-shadeeyay in ay kor-u-qaadaan isku-filnaanshaha iyo bogsashada iyagoo ku caawinaya ka-qaybgalayaasha in ay helaan oo ay joogteeyaan shaqaaleyn iyo guryeyn xassilan. Adeegyada guryeynta taageerada leh ayaa ku caawiyo shakhsiyaadka in ay helaan oo haystaan guryeynta bulshada. Adeegyada shaqada ee la taageeray ayaa ka caawiya shakhsiyaadka haysta caqabadaha dhanka shaqada in ay helaan shaqo iyo in ay haystaan. Adeegyadan ayaa kala shaqeeya loo-shaqeeyayaasha iyo mulkiilayaasha guryaha in ay waafajiyaan shakhsiyaadka deegaanka saxda ah iyagoo siinaya taageero joogto ah. Hase-yeeshee, adeegyadan ma bixiyaan lacagaha guryaha ama mushaaraad ama mushaar kordhis.

Cilmi-baaris ayaa muujineysa in shaqo la'aanta iyo sugnaan la'aanta shaqada, guri la'aanta, iyo xassilooni la'aanta guryaha in ay gacan ka geystaan caafimaadka liita. Kuwan ayaa sidoo kale loo yaqaanaa waxyaabaha go'aamiya caafimaadka bulshada (SDOH).[2] Guri la'aanta waa dhibaato dhaawac leh oo soo noqnoqota; waxay dadku halis u gelisaa xaaladaha caafimaadka jirka iyo dhimirka iyo SUDs. Si la mid ah, caddeynta ayaa ku xiriirinaysa shaqo la'aanta natiijooyinka caafimaadka dhimirka iyo kan jirka oo liita, xitaa iyadaan jirin xaalado horey u jirey.

FCS ayaa adeegsada laba hab-dhaqan oo caddeyn ku saleysan (taageerada iyo meelaynta gaarka ah iyo guri taageero leh oo joogto ah) si ay u bixiyaan adeegyo tayo leh oo ayna u wanaajiyaan natiijooyinka. Ilaa hadda, in ka badan 20,000 oo qof ayaa isku qorey FCS. Waxyaabihii horey loogu oggaadey barnaamijka ayaa muujinaya:

- Horumarinno istaatistik ahaan mug leh oo ka jira heerarka shaqaaleynta, kasbashooyinka, iyo saacadaha la shaqeeyay.
- Kororka istaatistik ahaanta mugga leh ee kala-guurrada looga baxayo guri la'aanta.
- Hoos-u-dhacyo rajo fiican muujinaya ee adeegsiga bukaan-jiifka iyo waaxda xaaladaha degdegga ah ee bukaan-socodka ee loogu talagay kuwa ku qoran FCS.

Si waafaqsan dib-u-cusboonaysiinta, FCS wuxuu sidoo kale:

- Awoodi doonaa in uu u isticmaalo maaliyadaha Medicaid in uu ku caawiyo kuwa ku qoran FCS in ay bixiyaan ujuurrooyinka kala-guurka ee halka mar la bixiyo (oo ay ku jiraan kirada bisha koowaad iyo tan ugu dambeysa, ujuurrooyinka codsiga, iyo/ama alaabooyinka guriga ee aasaasiga ah) marka qofka ku qoran uu ka baxayo caafimaadka dhimirka ee bukaan-jiifka ama daaweynta SUD, ama guri la'aan dareemay bisha ka horreysa ka hor qaadashada daaweynta.
- Ballaarin doonnaa xaq-u-yeelashada shaqada la taageero iyadoo lagu dari doonno dadka ka baxaya jeelka, xabsiga, ama kuwa leh xaaladda "xabsiga uga baxey si shuruud ku xiran."
- Ballaarinta xaq-u-yeelashada guryaha la taageero si loo gaarsiiyo kuwa jira 16 sano ama ka weyn. Tani waxay bixin doontaa awoood lagu siinayo taageerada kireysiga ka hor dhallinyarada jirta da'da kala-guurka iyo dhallinyarada ka baxeysa daryeelka korsashada.

Istiraatiijiyadaha wax looga qabanayo baahiyada bulshada ee caafimaadka la xiriira (tadawurka Hindisaha 1)

Shaqadan waxay ku saabsan tahay sii wanaajinta nidaamka bixinta daryeelka Apple Health ee ka jira Gobolka Washington. ACHs iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka Hinddida (IHCPs) waxay ka shaqeynaysaa sii wanaajinta caafimaadka dadka ku sugan bulshooyinkooda iyo degaannadooda. Inta lagu guda jiro lixda sano ee ugu horreeyo MTP, ACHs waxay ka shaqeynaysay dhisidda kartida nidaamyada caafimaadka iyo bulshooyinka, dib-u-nakhshadeynta daryeel bixinta, mideynta caafimaadka jirka iyo kan hab-dhaqanka, sii wanaajinta helidda daaweynta isticmaalka opioid, iyo meelaha kale.

Si waafaqsan dib-u-cusboonaysiinta, HCA, ACHs, MCOs, iyo la-hawlgalayaasha kale waxay sameyn doonnaan dedaalo cusub oo lagu dhisayo taageero caafimaad joogto ah oo dhaafsiisan daryeel caafimaad. Kuwan waxaa ka mid noqon doonna:

- **Adeegyada wax looga qabanayo baahiyaha aan la daboolin:** barnaamijyadan waxay bixiyaan dheefo toos ah oo la siiyo shakhsiyaadka si loo taageero caafimaadkooda iyo wannaagooda ee ka baxsan daryeelka caafimaad.
    - **Adeegyada beddelka ah (ILOS):** ILOS[3] waa adeegyada beddeli kara daryeelka caafimaadka ee la caddeeyay in ay yihiin kuwo habboon oo kharash ahaan taabogal ah. Tusaale ahaan, in roogagga yaalla

[2] Xarumaha Xakameynta iyo Ka Hortagga Cudurrada (CDC) ayaa ku qeexa SDOH in ay yihiin xaaladaha ka jira meelaha ay dad ku nool yihiin, wax ku bartaan, ka shaqeeyaan, ama ku ciyaaraan ee saameya natiijooyinka iyo halisaha kala duwan ee caafimaadka iyo tayada nolosha.

[3] ILOS waxaa ka mid noqon kara adeegyada hagidda kala-guurka guryeynta; lacagaha laga reebo/dhigo qofka guriga ijaaranaya; adeegyada kireysashada iyo gacan ku haynta guryaha; adeegyada daryeelka ku-meelgaarka; barnaamijyada lagu horumarinaya xirfadaha iyo waxqabadka ee maalintii ah; ka wareegidda/kala-guurka xarunta kalkaalinta ee loogu wareegayo xarunta xannaaneynta waayeelka iyo naafada; adeegyada kala-guurka bulshada/kala-guurka xarunta kalkaalinta ee loogu wareegayo guriga; la-qabsiyada adeegsiga degaanka (wax-ka-beddelka guriga); habka daaweynta cudurka neefta; cuntooyinka caafimaad ahaan habboon; xarumaha khamriga looga saaro jirka; guryeynta muddada-gaaban ee cusbitaal dhigista ka-dib; iyo goob caafimaad oo ku-meelgaar ahaan loogu xannaaneeyo bukaanka.

guriga qof la xanuunsan cudurka neefta lagu beddelo sagxad adag waa beddel caafimaad ahaan habboon oo kharash ahaanna taabogal ah in loogaga hortago booqashooyinka qolka xaaladaha degdegga ah ee soo noqnoqda ee qabashooyinka neefta. MCO-yada ama shirkadaha caymiska caafimaad ee u adeegga macaamiisha Medicaid ayaa durba soo bandhigi kara oo bixin kara lacagaha ILOS ee Washington. Dib-u-cusboonaysiinta[4], gobolku wuxuu rasmiyeyn doonnaa oo uu ballaarin doonnaa taxaalka dalabka ee ILOS la heli karo si ay suuragal u noqoto ina y dad badan helaan adeegyada ka caawinaya ina y caafimaadqabaan.

  - **Adeegyada la-xiriira caafimaadka (HRS):** barnaamijkan ayaa u oggolaan doonna gobolka in uu bixiyo caymis loogu talagalay baahiyada caafimaadka la xiriira. Gobolka ayaa qeexi doonna qofka heli kara adeegyada, iyo sidoo kale adeegyada la heli karo. Kuwan waxaa ka mid noqon kara gaadiidka, cuntada, guryeynta, iyo kaalmada maaliyadeed ee la beegsado (sida lacag-bixinnada adeegga). ACH-yada ayaa ka mas'uul noqon doonna in adeegyadan la waafajiyo iskaashiyada gudbinta ee la sameeyay iyadoo loo marayo Xarumaha Buslahda (hoos lagu sharxay). Adeegyadan waxaa loo nakh-shadeyn doonnaa in lagu kordhiyo laakiinse ma ahan in ay u ekaadaan adeegyada ILOS.

    Si ka duwan ILOS, adeegyadani ma ahan in ay beddelaan daryeel caafimaad gaar ah. Tusaale ahaan, dheefta gaadiidka waxaa ka mid noqon kara lacag-bixin si loogu caawiyo dadka waayeellada ah in ay tagaan xarunta dadka waayeellada ah toddobaadkiiba mar. Tani ma beddelayso daaweyn caafimaad kasta laakiinse waxay taageeraysaa wanaagga iyo caafimaadka jirka iyo dareenka.

- **Isuduwidda daryeelka ku saleysan bulshada:** ACH kasta waxay kor kala socon doontaa Xarunta Bulshada (Community Hub) ee gobolka si ay u bixiso isuduwidda daryeelka bulshada ku saleysan ee guud ahaan gobolka.

  Fikradda Xarunta Bulshada waa tadawurka shaqada ee bilowdey lixda sanadood ee ugu horreeyay ee MTP wuxuunna waafaqsan yahay barnaamijka CareConnect ee Waaxda Caafimaadka, kaas oo si gaar ah ugu adeegga dadka ku jira karantiilka iyo gooni-u-sooca sababta u ah COVID-19. Shaqooyinka Xarunta Bulshada ayaa la jaangoyn doonnaa waxaanna ka mid ah baaritaanka SDOH, caawimaadda aqoonsashada iyo hagidda khayraadyada bulshada, gudbinnada, iyo lacag-bixinta loogu talagalay shaqaalaha caafimaadka bulshada (CHWs)

  Xarumaha Bulshada ma ahan kuwo shabbaha isuduwidda daryeelka caafimaadka, laakiinse waxay bixiyaan taageerada muhiimka ah ee loo baahan yahay si shakhsiyaadka loogu xiriirriyo kheyraadyada bulshada iyo ururrada, oo ay ku jiraan daryeelka aasaasiga ah. Habkan, Xarumaha waxay taageero muhiim ah siiyaan nidaamka caafimaadka iyo bulshada.

  Xarumaha Bulshada waxaa ku baxaya waqti iyo dhaqaale si loo dhiso. Gobolka wuxuu horey u bixin doonnaa maaliyadda nakh-shadda iyo hirgelinta ee gobol kasta; tani waxay goor dambe kor u qaadi doontaa maaliyadda hawlgalka ee lagu taageerayo Xarunta shaqeynaysa. Maaliyadsiinta ayaa la hagaajin doonnaa iyadoo lagu saleynayo baahiyada gobol kasta.

- **Sinnaanta caafimaadka iyo maalgelinta kartida/awoodda bulshada:** HCA ayaa tixgelinaya istiraatiijiyad ku saabsan maalgelinta sinnaanta caafimaadka ee debecsan. Iyagoo ra'yi ka qaadanaya bulshada, ayaa ACHs-yada waxay maareyn doonnaan maaliyadaha wax looga qabanayo sinnaanta caafimaadka iyo SDOH. Maalgelinnadan waxaa loo nakh-shadeyn doonnaa in ay taageeraan baahiyada iyo hindiseyaasha bulshada ballaaran, dhammeystirka adeegyada gaarka ah ee la bixiyey iyadoo loo marayo goobaha kale ee shaqada. Faahfaahinnada maaliyadan ayaa weli la diyaarinayaa.

Mashaariicda gaarka u ah IHCP ayaa sidoo kale qayb ka ahaa Hindisaha 1 lixda sano ee ugu horreeyay ee MTP. Mashaariicdan waxaa nakh-shadeeyay oo loogu talagalay dadka Dhaladka ah, iyadoo la kaashanayo HCA, si:

- Sida hadda si ka fiican loogaga soo baxo baahiyada qofka oo dhan ee Hinddida Mareykanka iyo Dadka Asal Ahaan u dhashay Alaska (AI/ANs).
- Loo sii wanaajiyo maamulka IHCP iyo awoodda farsamo.
- Looga shaqeeyo sidii loo yareyn lahaa sannaan la'aanta caafimaadka ee ay la kulmaan AI/ANs.

Sida ay qabto dib-u-cusboonaysiinta MTP, waxaa jiri doonna taageero loogu talagalay horumarinta Xarunta Bulshada Dadka Asaliga ah ee gobolka oo dhan, iyadoo diiradda la saarayo baahiyda isuduwidda daryeelka bulshada ee AI/ANs. Waxaa sidoo kale jiri doonna taageero loogu talagelay dedaallada la midka ah ee kuwa ACH-yada, oo la diyaariyey iyadoo wadatashi lala yeeshay Qabiillada iyo IHCP-yada si loo aqoonsado HCA iyo xiriirka gaarka ah ee Qabiillada iyo si wax looga qabto baahiyada gaarka ah ee AI/ANs.

Ogow wax badan oo ku saabsan tadawurka Hindisaha 1.

[4] Ogow in ILOS uu yahay hab durba la heli karo iyadoo loo marayo daryeelka la maareeyo umana baahna awood ka-tanaasulid ama maalgelin si loo hirgeliyo. Waxaan adeegsaneynaa dib-u-cusboonaysiinta si aan adeegyadan uga dhigno kuwo aad loo heli karo.